



UJEEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **01/12/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- ABDIRIZAK GOOD ABDI, Ina Amina Sheekh Maxamed, Somali ah, Ku Dhashay: Beledweyne, Sanadkii: 03/05/1981, Sita: Somali Passport, Lr. P01500587

LA WAKIISHE:- NOR ABDI OSMAN, Ina Maryan Sheekh Aadan, Somali ah, Ku Dhashay: Qoryooley, Sanadkii: 21/04/1989, Degan Dharkeynley, Sita: Somali Passport, Lr. P01460128

TILMAAMAHA GURIGA

Guri Dhisan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Wadajir)**, Cabirka: **(20X10-Mt)**, Looto No: **2870-Biis**, W.M.L: **(Rep.No.06196/NK/15)**, Tr. **27/07/2015**, Kana Soo Baxay Nootaayo Kaatib, Uuna Saxiixay Dr. Cabdulqaadir Cumar Kaatib

SOOHDINTA GURIGA

Bari: **Jid**, Koonfur: Guri dad, Galbeed: Guri dad, Waqooyi: Guri dad

B- Aniga oo ah **ABDIRIZAK GOOD ABDI**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **NOR ABDI OSMAN** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Guriga Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in Gurigaas uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhisi karo, Dayactiri karo, ijaari karo, Rahan galin karo/Kana saari karo rahanta, isla markaasna ii saxiixi karo Qoraalka rahan dhigashada, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **NOR ABDI OSMAN** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Gurigaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **NOR ABDI OSMAN**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **ABDIRIZAK GOOD ABDI**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

ABDIRIZAK GOOD ABDI

1- SAYIDOMAR ALI MUSE

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

NOR ABDI OSMAN

2- SALAH ALI JAMA

REP. 1984/T.P.N/25, Tr. 01/12/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- ABDIRIZAK GOOD ABDI** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- NOR ABDI OSMAN** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: ABDULL

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Xafiiska Nootaayada iyo Latalinta
Arrimaha Sharciga ee Kaatib

Mogadishu - Somalia



KATIB LAW OFFICE AND PUBLIC
NOTARY SERVICE

مكتب كاتب للاستشارات
القانونية وتوثيق العقود

مقديشوا - الصومال

UJEEDO: MESHIS BEEC GURI MUNICIPALE AH.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **27/07/2015**, anigoo ah: **ADAM ABDULLAHI SHEIK ABDI**, haystana wakalada rasmiga ah lambarkeeduna yahay **Ref: OL/DBI-MGQ/175/2015**, kuna saxiixan yahay gudoomiyaha Bangiga Dahabshil Bank International(DBI), waxaan qoraalkaan ku caddeynayaa in aan ka siiyay kuna wareejiyay **ABDIRIZAK GOOD ABDI**, hooyadiisna la yiraahdo **Amina Sheikh Mohamed**, ku dhashay **Beledweyn**, Sanadkii **1981**, degan **Xamar**, dhul dhisan oo ka kooban 3-qol oo bulukeeti ah, 2-qol oo jingad ah, jiko, iyo musqul, cabirkiisuna waxa uu dhan yahay **20x10, Lotto Lam:2870-Biis**, kuna yaalla Xamar Degmada Wadajir, Soohdintiisuna tahay sidaan soo socoto:- **Waqooyi** waxaa ka xiga guri dad, **Galbeed** guri dad, **Bari** waxaa ka xiga jid, koonfur waxaa ka xiga guri dad, waxaana dhulkaas ku milkiyay warqadda kala gadashada lambarkeedu yahay Rep 06191/NK/15, Tr.26/07/2015 kuna saxiixan yahay Dr. Cabdulqaadir Cumar Kaatib, kana soo baxday Xafiiska Nootaayo Kaatib waxaana ku gaday anigoo ka wakiil ah bangiga dhulkaas lacag dhan **\$57,825 (Konton iyo Todobo Kun Sideed Boqol Labaatan iyo Shan oo doollarka mareykanka ah)**. lacagtaas dhamaanteed waan u qaaday Bangiga nootaayadda horteeda.

Haddaba waxaan caddeynayaa in dhulkaas aan wareejiyay uu ka madax banaan yahay rahan xaquuq dad-kale, wixii dhib ah ama sharci duris ah iyo sheegasho dad kale, ee ku yimaada milkiyadda dhulkaas, waxaa mas'uul buuxa ka ah anigoo ah:- **ADAM ABDULLAHI SHEIK ABDI**, oo ah wakiilka Bangiga, isla markaana iibsadaha **ABDIRIZAK GOOD ABDI** wuu aqbalay beecaan nootaayada horteeda.

SAXIIXA WAKIILKA BANGIGA
ADAM ABDULLAHI SHEIK ABDI

SAXIIXA IIBSADAHAA GURIGA
ABDIRIZAK GOOD ABDI

Cilmi Siyaad Maalin

SAXIIXA MARKHAATIYAALKA
Cabdiraxmaan Maxamed Cumar

Maxamed Xasan Caalin

Rep.no. 06196/NK/15

SUGITAANKA NOOTAAYADA

Tr.27/07/2015

Anigoo ah **Dr. Cabdulqaadir Cumar Kaatib**, leh xafiis nootaayo, ku yaalla Xamar, degmada Waaberi, Wadada Maka Al-mukaramah ka soo horjeedka daarta Gaabow, waxaan halkan ku caddeynayaa heshiiskan kor ku xusan ee kala gadasho **guriga 20x10** in uu yahay mid sax ah, waafaqsan sharceeda islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyada Soomaaliya, islamarkaana ay saxiixeen dhinacyada heshiiskan khuseeyo nootaayaduna waxey hubisay magacyadaas inay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyadan kor ku xusan.

NOOTAAYAHA
Dr. Cabdulqaadir Cumar Kaatib





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 03/12/2025

Aniga oo ah **Cabaas C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **NUUR CABDI CISMAAN** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1984/T.P.N/25, Tr. 01/12/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	NUUR CABDI CISMAAN
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X10-M
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Wadajir
Lotto Lambar	2870-BIIS
W.M.L	06196/NK/15, Tr. 27/07/2015 Ka soo baxday Nootaayo Kaatib
Taariikhda Wakaalada	01/12/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **NUUR CABDI CISMAAN**,
Leh Tel No. **0615653350**, Degan **Dharkenley** Waxaan
Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska
Nootaayaha Tayo Dukumiintiga Wakaalada faah
faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Cabaas C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAH

NUUR CABDI CISMAAN